

Buuxinta Ballanqaadkayaga

Waxaannu u huran nahay in aannu kula shaqayno si nabadda loogu kordhiyo London. Haddii aannu buuxin weyno Ballanqaadkayaga waxaannu kuu macnayn doonnaa sababta ay mar gaar ah u suurto geli weydey in aannu fulinno heerka sare ee aannu ku dadaalno aadna adigu u qalanto.

Haddii aad dareensan tahay in aanan buuxin Ballanqaadkayaga waxaannu rabnaa in aannu war kaa helno. Waxaad faallo kaga tagi kartaa qaybta 'Your Voice Counts' (Ra'yigaagu Waa Muhiim) ee boggayaga internetka ama waxaad naga soo wici kartaa lambarka **020 7230 4737**. Waxaannu kaaga mahadcelin doonnaa faalladaada 24 saacadood gudahood ka dib marka aad noo soo dirto. Waxaannu weliba kuugu baaqi doonnaa in aannu fool-ka-fool kaala hadalno faalladaada waxaan kuu sheegi doonnaa sida aannu taas wax uga qaban doonno.

Adeeggayaga waxaa maareeya Masuuliyiinta Booliiska ee Metropolitan (Metropolitan Police Authority) waxaanad weliba faallooyinka iyaga ugu diri kartaa halkan enquiries@mpa.gov.uk



Sida aad adigu noo caawin karto

Waxaa jira xoogaa tallaabooyin ah oo aad qaadi karto si aad nooga caawiso in aannu ku siinno adeegga ugu fiican ee noo suurogalka ah:

- Marwalba soo waac **999** marka ay xaalad degdeg ah timaaddo matalan marka dembi la geysanayo, adigu og tahay in qof dembi ku tuhunsan uu meel kuu dhow joogo, ama qof dhaawacmo, loo hanjabayo ama uu khatar ku jiro.
- Marka aanay xaaladdu degdeg ahayn dembiga kaga soo warbixi internetka halkan www.met.police.uk ama naga soo wac lambarka **0300 123 1212**. Sidoo kale lambarkaas soo wac si aad noo siiso warbixin naga caawin karta in aannu dembiyada ka hortagno ama soo ogaanno. Haddii kale waxaad warbixin si magac la'aan ah nooga siin kartaa dembi kaste adigoo hay'adda Crimestoppers (Dembi joojiyayaasha) ka soo wacaya lambarka **0800 555 111**. Hay'adda Crimestoppers waa hay'ad samafal ah oo madaxbannaan.
- Haddii aad dhego laadahay ama dhego culus tahay waxaad isticmaali kartaa telefoon qoraal (textphone) si aad noo soo wacdo. Soo garaac lambarka **18000** marka ay xaalad degdeg ah timaaddo, ama **18001 0300 123 1212** haddii aanay wicistaadu la xiriirin xaalad degdeg ah.
- Waxaad hawlaha kaga qayb geli kartaa adigoo ku biira Ilaalinta Xaafaddaada (Neighbourhood Watch), adigoo ka qayb qaata kulannada Nabadda dheeraadka ah ee Xaafadaha ama adigoo noqda askari gaar ah ama mutaddawac ee Met (Met volunteer). La xiriir kooxdaada Nabadda dheeraadka ah ee Xaafadaha si aad u hesho warbixin ku saabsan kulannada xaafaddaada, macluumaadkooda waxaad ka heli kartaa halkan www.met.police.uk/saferneighbourhoods, ama si aad u hesho warbixin dheeraad ah oo ku saabsan mutaddawacnimada booqo www.met.police.uk/recruitment.
- Haddii aad aragto fal ama habdhaqan shaki leh, si kastoo ay u ahmiyad yar tahayba, soo wac khadka warbixinta sirta ah ee ka hortagga argagaxisooyinka oo ah **0800 789 321**.

Somali

Ballanqaadka Booliiska Ballanka aannu u qaadayno dadweynaha



Ballanqaadka Booliiska – ballanka aannu u qaadayno dadweynaha

Xoogga Booliiska ee Metropolitan (Metropolitan Police Service) waxaa sharaf u ah in ay adeegga ugu fiican ee suurogalka ah ugu deeqaan dadka ku nool London oo Ballanqaadkayaga Booliiska (Policing Pledge) ayaa qeexaya xeerasha adeegga ee aad naga filan karto.

Nuskhadda buuxda ee Ballanqaadkayaga Booliiska waxaa laga heli karaa boggayaga internetka oo ah www.met.police.uk

Haddii aad warbixintan ugu baahato nuskhad kale fadlan naga soo wac **020 7230 4737**.



Kuwan ayaa ah qaar ka mid ah hawlaha aannu ugu huran nahay Ballanqaadkayaga ugu muhiimsan

- Waxaannu marwalba kuula dhaqmi doonnaa si xaq ah, oo sharaf iyo xushmayn leh, annagoo hubinayna in qofwalba uu heli karo adeeggayaga waqti macquul ah oo habboon.
- Waxaannu ku dadaali doonnaa in aannu adiga iyo xaafaddaadaba idinka ilaalinno waxyeellada. Qayb xaafadeed kasteba waxaa u diyaar ah koox Nabadda dheeraadka ah ee Xaafadaha (Safer Neighbourhoods) oo u go'an iyagoo ku deeqi doona xoog booliis oo la arki karo waxayna meel kale ka shaqayn doonaan uun haddii ay daruuri noqoto. Waxay waqtigooda ugu yaraan boqolkiiba 80 ku bixin doonaan in iyagoo la arkayo ay ka shaqeeyaan xaafaddaada, iyagoo wax ka qabanaya arrimaha booliiska loogu baahan yahay ee xaafaddaada ugu mudnaan badan.
- Waxaannu soo saari doonnaa macluumaadka kooxdaada Nabadda dheeraadka ah ee Xaafadaha si aad u ogaato dadka ka mid ah kooxda xaafaddaada u go'an iyo sida aad iyaga ula xiriiri karto.
- Waxaannu 24 saacadood gudahood kaga soo jawaabi doonnaa farriin kastoo loo diro kooxdaada Nabadda dheeraadka ah ee Xaafadaha..
- Waxaannu isku wadnaa in aannu wicista 999 kaaga qabanno 10 ilbiriqsi iyo wicista aanan degdegga ahayn 30 ilbiriqsi. Waxaannu dadka na soo wacaya marwalba u sheegi doonnaa waxa xiga ee dhacaya waxaanan u sheegi doonnaa waqtiga qiyaas ahaan aannu iman doonno haddii ay habboon tahay.
- Waxaannu islamarkaaba ka jawaabi doonnaa xaaladaha degdegga ah si aannu dhacdooyinka



- u gaarno sida ugu dhakhso badan uguna nabadaysan ee suurogalka ah – annagoo isku wadna in aannu ku imanno 12 daqiiqo gudahood iyo waqti ka dakhso badan haddii ay suurogal tahay.
- Marka aannu ka jawaabayno xaaladaha aanan degdegga ahayn ee qabsada dhibbaneyaasha iyo markhaatida nuglan ama la xiriira arrimaha ugu mudnaan badan xaafadda ee lagu heshiiyey waxaannu isku wadnaa in aannu kugu soo gaarno 60 daqiiqo gudahood. (Waxaannu u isticmaalaynaa ereyga 'nuglan' si aannu u tilmaanno qofka laga yaabo in uu halis ugu jiro sababtoo ah da'diisa, naafonimadiisa ama xaaladdiisa shakhsi ahaaneed.)
- Haddii kale, marka habboon, waxaannu 48 saacadood gudahood kuugu qaban doonnaa ballan si aannu kuu aragno waqti adiga kuu habboon.
- Waxaannu ka soo qayb geli doonnaa kulannada dadweynaha ee joogtada ah, ugu yaraan bishiiba mar, si aannu ugu heshiinno arrimaha dembiyada iyo booliiska la xiriira ee xaafadda ugu mudnaan badan iyo si aannu warar cusub uga bixinno arrimaha dembiyada iyo booliiska la xiriira ee xaafaddaada khuseeya.
- Waxaannu dhibbaneyaasha la socodsiin doonnaa horusocodka kiisaskooda khuseeya ugu yaraan mar bishiiba.
- Waxaannu 10 maalmood oo shaqo gudahood kula xiriiri doonnaa dadka galay shil gaadiidka waddada la xiriira.